

Sharciga 26 Maajo 1962, lamba. 8.

Sharci u-beddelid (rogid), ayada oo ay wehliyaan wax-ka-beddello, Xeerka – Sharci, ee 27 Maarso 1962, Ir. 5, oo khuseeya Dhisidda Sanduuqa xagga Támiinka Bulsho, ee Soomaaliya (W.B.Sh./Wakaaladda Badbaadada, ee Soomaaliya).

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta;

WUXUU GUDDOONINAYAA OO UU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodob Kaliyaale

Waxaa sharci loo rogay Xeerka – sharci, 27 Maarso 1962, lamba. 5, oo khuseeya (ku saabsan) dhisidda Sanduuqa xagga Támiinka Bulsho, ee Soomaaliya (W.B.Sha.), oo ay wehliyaan wax-ka-beddellada soo socda:

“QOD. 6aad (Xubnaha);

xubnaha Wak.Bad.Sh. waa:

- a) Guddoomiyaha;
- b) Golaha Maamulka;
- c) Agaasimaha Guud;
- d) Guddiga Hanti-dhowrayaasha.

Nidaamka Maamulka, dhexe iyo daafaha, ee W.B.SH. waxaa dejiya Xeerka ku xusan qodobka 2aad, xagga dhammaan waxyaabaha uusan nidaamineyn Xeerkan – sharci.”

“QOD. 7AAD. (Guddoomiyaha).

Guddoomiyaha waxa lagu magacaabayaa xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda kiisa ah, ayada oo laga duulayo soo-jeedinta Wasiirka Caafimaadka, Xannaanada oolaha iyo haqada oo la heshiis ah Wasiirka Maaliyadda, ayada oo la dhegeystay Golaha wasiirrada. Muddada xil-haynta Guddoomiyaha waa saddex sano, dib ayaana loogu cayimi karaa”.

“QOD. 8AAD (Waajibaadka Guddoomiyaha).

Guddoomiyuhu:

- a) wuxuu yeelanayaa matalaadda sharci, ee W.B.SH., haddii laga reebo maraka matalaaddaas u gudbto agaasimaha Guud, wuxuuna gudanayaa xilaka ay ka dalbayaan xeerkan – sharci iyo Xeerka (Dastuurka);
- b) wuxuu isugu yeerayaa oo uu shir-guddoominayaa Golaha Maamulka;
- c) waxa uu goynayaa mowduucyada (ajendooyinka) la geynayo doodda Golaha, wuxuuna ilbaadinayaa fulinta qaraarradiisa;
- d) wuxuu qaadayaa, haddii ay jirto baahi degdeg ah, tallaabooyinka uu ikhtisaaska u leeyahay Golaha Maamulka oolagama maarmaanka u ah in la xaqiijiyo habsami u-shaqaynta SANDUUCA, haddii laga reebo wixii uu ansixiyo Golaha qudhiisa fadhigiisa kowaad, ee xiga;

Haddii uu maqan yahay ama ay jirto caqabad ka hor-istaageyso gudashada xilka, guddoomiyaha waxaa beddelaaya La-taliyaha ugu dáda weyn.

Guddoomiyuhu, markuu dhegeysto golaha Maamulka, in u wakiisho, xagga gudashada waajibaadka qaar, matalaadda sharci, ee W.B.SH., Agaasimaha Guud.”

“QOD. 9AAD. (Golaha Maamulka).

Golaha Maamulka waxa uu ka kooban yahay guddoomiyaha iyo xubnaha soo socda oo laga cayimaayo (magacaabayo) Xeer uu uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda, kaddib soo-jeedinta Wasiirka Caafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada, oo is-af-garad la wadaago Wasiirka Maaliyadda, markuu dhegeysto Golaha Wasiirrada:

- a) Laba wakiil, oo ka socda shaqaalaha, oo ay soo cayimaan Ururrada Shaqaalaha oo ugu mudan (loo-qaateen ah);
- b) Laba wakiil oo ka socda loo-shaqeeyayaasha, oo ay soo cayimaan Ururrada loo-shaqeeyayaasha, oo ugu mudan, oo heer qaran;
- c) Madaxa Waaxda Shaqada;
- d) Hawlwadeen uu soo cayimo Wasiirka Maaliyadda;
- e) Hawlwadeen uu soo cayimo Wasiirka Hawlaha Guud iyo Isgaarsiita;
- f) Hawlwadeen uu soo cayimo Wasiirka Wershadaha iyo Ganacsiga;
- g) Hawlwadeen uu soo cayimo Wasiirka Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha,

Xubnaha Golaha Maamulka waxa ay xilka haynayaa saddex sano, dib ayaana loogu soo celin karaa.”

Sharcigan waxaa la gelinayaa Uruurinta Rasmiga, ee Sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta oo leg waa lagu khasbayaa iyo in ay u dhowrto sida sharci ay leedahay Jamhuuriyadda.

Taariikhda Muqdisho, maanta oo ah 26 Maajo 1962.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Aden Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Caafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada

Maxamuud Axmed Maxamed Caddaan

Wasiirka Maaliyadda

Cabdulqadir Maxamed Aden